



Abaalmarinta Hagaajinta Tayada Early Achievers

Dulmarka

Abaalmarinta Hagaajinta Tayada (QI) waxaa lagu abaalmariya ka qayb-galayaasha Early Achievers si loo aqoonsado guusha iyo taagyeerada fulinta ujeedooyinka horumarinta tayada. Xeerka Early Start ee 2015 wuxuu sheegayaa, [laga bilaabo Julaay 1, 2016](#); inay bixiyayaasha u adeegaan carruurta qaadata kaalmooyinka daryeelka carruurta gobolka si ay xaq ugu yeeshaan Abaalmarinta QI.

U-qalmidda abaalmarinta

Si ay ugu qalmaan inay helaan Abaalmarinada QI, kaqaybgalayaashu waa inay:

- Bixiso daryeelka carruurta oo dadka ka diiwaan geshan ay ugu yaraan 5% wadarta awoodda shatigu yihiin carruurta aan da'da dugsiga gaarin ee hadda qaata kaalmada dowladda.
- Noqdo ka qaybgale firfircoon oo Early Achievers ah oo lagu qiimeeyay Heerka 3 ama wax ka sarreeya. Bixiyayaasha Daryeelka Carruurta ee Guriga Qoyska ee lagu qiimeeyay Heerka 2 ama wax ka sareeya ayaa u qalmi kara Abaalmarinta QI.
- Sameeyay oo u wada Qorshaha Hagaajinta Tayada (QIP), sida ku cad Tilmaamaha Howlgalka Xubinta Early Achievers.
- Oo iska diiwaangelisa iibiye ahaan Gobolka Washington iyagoo u soo gudbinaya [Foomka Diiwaangelinta Bixiyaha Gobolka iyo W-9](#) Waaxda Waxbarashada Hore (Department of Early Learning). Diiwaangelinta waa in lagu buuxiya magaca xarunta, maadaama miisaaniyadaha aan la siin karin shaqsiyaad. Xarumaha oo dhan waa in ay soo gudbiyaan diiwaankooda bixiyaha iyo W-9 kahor mudada ay helayaan lacagta abaalmarinta.

Qiimaha Abaalmarinta Hagaajinta Tayada

Abaalmarinta QI waxaa la qaybiyaa sannadiiba mar iyadoo la eegayo nooca qiimeynta iyo bixiyaha. Laga bilaabo Julaay 1, 2016, Qiimaha abaalmarinta QI waa:

Abaalmarinta QI ee Daryeelka Carruurta ee Guriga Qoyska

- Heerka 2 - \$1000
- Heerka 3 - \$2250
- Heerka 4 - \$2500
- Heerka 5 - \$2750

Abaalmarinta QI ee Xarunta Daryeelka Carruurta

- Heerka 3 - \$5000
- Heerka 4 - \$7500
- Heerka 5 - \$9000

Xisaabinta Boqolkiiba Tirada Dadka Ka Diiwaangeshan ee Lakabayo

Waaxda Waxbarashada Hore (DEL) ayaa xisaabin doonta boqolkiiba carruurta helaya kaalmada iyagoo ku daraya tirada carruurta aan da'da dugsiga gaarin ee kaalmada hesha ee loo adeegi jiray bil kasta 12kii bilood ee ka horreeyey taariikhda qiimeynta la sii daayay. Wadarta guud waxaa loo kala qeybin doonaa tirada bilaha carruurta ay ku suganayeen xarunta si loo ogaado tirada isku celceliska ah ee carruurta hela kaalmada ee bil walba loo adeego. Celceliskaas waxaa markaas loo qaybin doonaa tirada awoodda guud ee shatiga si loo helo boqolkiiba inta kama dambaysta ah ee carruurta hesha kaalmada ee loo adeegayo. Biilasha waa in lagu soo dira si dhaqso leh si loo hubiyo in si sax ah loo xisaabo.

Muunada Xisaabinta Xarunta Daryeelka Carruurta

Shaxdaan soo socota waxay ku tusaysa sida xisaabtani u ekaan karto xarunta daryeelka carruurta ee caadiga ah. Tusaalahaan, xarunta waxay haysataa shati awood u leh inuu u adeego carruurta aan da'da dugsiga gaarin oo dhan 25 jadwalka dugsiga ee 9ka bilood ah. Shaxda ugu horreysay waxay muujinaysaa muddada abaalmarinta 12ka bilooda oo ku salaysan taariikhda qiimeynta la shaaciyey oo ahayd Agoosto 15:

Bilaha Adeega	Tirada carruurta la kabo ee loo adeego (oo ku salaysan biilkii la soo gudbiyey)
Ogoosto	Xirnaa
Sibtambar	5
Oktoobar	5
Nofember	4
Diisambar	4
Janaayo	0
Febraayo	3
Maarso	4
Abriil	4
May	5
Junyo 15	Xirnaa
Julaay	Xirnaa
Wadarta Sannadka	34

Si loo go'aamiyo boqolkiiba xarunta, wadarta guud ee sannadlaha ah (34) waxaa loo qaybiya tirada bilaha xarunta u adeegtay carruurta (9) si aad u hesho tirada isku celceliska ah ee carruurta qaata kaalmada bil kasta (3.77). Celceliska tirada carruurta qaata kaalmada waxaa loo qaybinayaa tirada guud ee awoodda celcelis ahaanta shatiga xarunta 25 boqolkiiba ah 15%, sida lagu muujiyay shaxda labaad ee hoos ku qoran:

Wadarta tirada carruurta kaalmada hesha ee loo adeegi jiray 12kii bilood ee la soo dhaafay	Tirada bilaha ay furanaayeen 12kii bilood ee la soo dhaafay	Celceliska tirada ay u adeegeen bishiiba (34/9)	Celceliska guud ee awoodda shatiga	Boqolkiiba carruurta hesha kaalmada (3.77/25)
34	9	3.77	25	15%

Iyada oo lagu saleynayo kamadambeysta boqolkiiba, taasoo ka sareysa ugu yaraan 5%, marka xaruntaasi waxay xaq u leedahay Abaalmarinta Hagaajinta Tayada.

Muunada Xisaabinta Daryeelka Carruurta ee Guriga Qoyska

Shaxda soo socota waxay muujinaysa tirada carruurta uu u adeegi jiray bil kasta bixiyaha daryeelka carruurta guriga qoyska ee u adeegayay qoysaska shaqo xilliyeedka.

Tusaalahaan, bixiyaha ayaa haysta wadarta awoodda shati gaaraya ilaa lix carruur ah, laakiin keliya u adeega carruurta inta lagu jiro qayb ka mid ah sannadka. Bixiyaha waa in uu xiran yahay bishaas oo dhan si bishaas looga saaro xisaabinta.

Bilaha Adeega	Tirada carruurta la kabo ee loo adeego (oo ku salaysan biilkii la soo gudbiyey)
Ogoosto	1
Sibtambar	2
Oktoobar	2
Nofember	2
Diisambar	Xirnaa
Janaayo	Xirnaa
Febraayo	Xirnaa
Maarso	Xirnaa
Abriil	0
May	1
Junyo 15	1
Julaay	1
Wadarta Sannadka	10

Tirada carruurta hesha kaalmada ee bixiyaha u adeegi jiray bil kasta waa la isku wada daraya wadar ahaan 10. Wadarta guud waxaa loo qaybin doona tirada bilaha bixiyahu u adeegay carruur (8) si loo helo tirada isku celceliska ah ee carruurta qaata kaalmada bil kasta (1.25). Celceliska tirada carruurta qaata kaalmada waxaa loo qaybinayaa tirada guud ee awoodda celcelis ahaanta shatiga xarunta 6 boqolkiiba ah 20.8%, sida lagu muujiyay shaxda labaad ee hoos ku qoran:

Wadarta tirada carruurta kaalmada hesha ee loo adeegi jiray 12kii bilood ee la soo dhaafay	Tirada bilaha ay furanaayeen 12kii bilood ee la soo dhaafay	Celceliska tirada ay u adeegeen bishiiba (10/8)	Celceliska guud ee awoodda shatiga	Boqolkiiba carruurta hesha kaalmada (1.25/6)
10	8	1.25	6	20.8%

Su'aalaha Badanaa La Is-weydiyo

Waa kuwee kaalmooyinka loo tirin doono xisaabinta 5%?

Daryeelka Carruurta ee Xiriirinta Shaqaynta (WCCC), Daryeelka Carruurta ee Xilliyeedka (SCC), Daryeelka Carruurta ee Hoy la'aanta (HCC) iyo Maamulka Carruurta (CA) kaalmooyinkooda dhaqaale ee carruurta da'da aan dugsiga gaarin ayaa dhammaantood ka mid ah kuwa loo xisaabinayo boqolkiiba. Goobaha daryeelka carruurta ee maaliyadooda uu Gobolku bixiyo iyo daryeelka carruurta ECLIPSE ayaa sidoo kale loo tirin doonaa xisaabinta 5%.

Maxaa dhacaya haddii uusan barnaamijkaygu shaqeynayn sannadka oo dhan?

Bil walba oo aad u adeegto carruurta waxaa lagu dari doona xisaabinta boqolkiiba. Waa in aad xiran yahay bishaas oo dhan si bishaas looga saaro xisaabinta.

Carruurta da'da dugsiga ah ee hesha kaalmada ma lagu dari doona tirinta 5%?

Carruurta da'da dugsiga ah ee hesha kaalmada laguma dari doono tirinta 5% Carruurta da'da dugsiga waxaa lagu qeexa carruurta da'doodu tahay ilaa iyo 5 jirka kuwaas oo dhigta Kindergartenka ama dugsiga fasalka iyo dhammaan carruurta da'doodu tahay 7 jir iyo wixii ka weyn, iyadoo aan loo eegin isku qorista dugsiyada.

Maxaa dhici doona haddii awoodda shatigaygu kala duwan tahay bil ka bil?

Haddii ay jiraan isbedello ku dhaca wadarta awoodda shatigaada, DEL waxay isticmaali doonta awoodda celcelis ahaaneed ee inta lagu jiro bilaha xarunta u adeegayso carruurta.

Maxaan u baahannahay si aan u helo Abaalmarintayda QI?

Waxaad u baahan doontaa in aad u soo gudbiso biilashaada sida caadiga ah, hubso in dhammaan biilasha muddada abaalmarinta la soo gudbiyo 30 casho gudhooda laga



bilaabo taariikhda qiimeynta la shaaciyey. Xaq u-yeelashada si toos ah ayaa loo xisaabin doonaa sannad kasta 60 casho kadib taariikhda qiimeynta la shaaciyey. Kahor inta aadan helin abaalmarinta, waa in aad sidoo kale isku diiwaangelisa sidii iibiya gobolka adigoo soo buuxinaya Diiwaangelinta Gobolka Oo dhana iyo foomka W-9, kaas oo laga heli karto del.wa.gov/publications/elac-gris/docs/DEL_StateWideVendor_Payee_Form_MERIT.pdf.

Waxaan la i qiimeeyay dhowr sano oo had iyo jeer waxaan u qalmayay abaalmarinta QI, iyadoo ku salaysan xeerarkii jiray waqtigii qiimeynteeyda. Ma ii sii socon doonta u qalmida ilaa iyo dib u cusboonaysiinta sadex sannadlaha ee qiimeynta?

Laga bilaabo Julaay 1, 2016, dhammaan ka qaybgalayaasha Early Achiever waa in ay buuxiyaan shuruudaha u-qalmiitanka kor ku xusan, iyadoo aan loo eegin markii ay isku qoreen. Nasiib wanaag, waxaad sii wadi kartaa si aad u hesho Abaalmarinta QI sannadaha soo socda adigoo oo siinaya daryeelka qoysaska qaata kaalmada gobolka ee daryeelka carruur. macluumaad dheraada oo kaalamada bixiyayaasha waxaa laga heli kara www.del.wa.gov/requirements/info/subsidy.aspx

Sidee ku ogaan kara inaan helayo ama aanan helayn abaalmarinta QI?

Ka qaybqalayaasha la qiimeeyay waxay ka heli doonaan email DEL ka kooban natiijooyinka xisaabinta iyo haddii ay ka filan karaan in ay heli karaan Abaalmarinta QI ku dhowaad 60 casho kadib taariikhda qiimeynta la shaaciyey.

Anigu ma aanan soo wada dirin biilashii ka horeeyay markii xisaabinta la sameeyay. Hada ma soo diri kara?

Dhamaan biilka waa inay heshaa DSHS hor inta aan la go'aamin boqolleyda maalinta 60aad kadib taariikhda qiimeynta la shaaciyey. Markii xisaabinta la dhamaystiro, wax bedelid ah laguma sameeyn doono biilasha dheeraadka ah muddada 12ka bilooda.

Anigu waxaan helay email sheegaysa inaan anigu u qalmin Abaalmarinta QI iyo anigu waxaan aaminsanahay inay taasi qalad tahay? Maxaan anigu sameeya?

Xisaabaha DEL waxay ku salaysan yihiin biilasha kaalmada ee oo soo gudbiyay DSHS 12 bilood ee buuxda ee ka horeeyay taariikhda qiimeynta ka qeybgalaha la shaaciyey. Haddii aad soo gudbisay WCCC, SCC ama biilka CA ee muddada ka horaysa waqtiga xisaabinta oo aad aaminsan tahay in biilka ka mid ah kuwaas aan lagu soo darin xisaabinta boqolkiiba, fadlan la xiriir DSHS si loo hubiyo in dhammaan qaansheegadka si fiican loogu daro xisaabtaada. Bixiyayaasha qaata lacagta HCC, ECLIPSE ama Medicaid waa inay kala xiriiraan DEL gris@del.wa.gov haddii ay rumaysan yihiin inay jirto qalad xaga xisaabinta ah.

Goormaan heli doona lacagta Abaalmarinra QI?

Abaalmarinta QI waxaa la qeybin doona qiyaas ahaan 90 casho kadib markii la shaaciyeye qiimeynta xaruntaas.

Anigu uma qalmo Abaalmarinta QI sannadkaan. Ma heli kara sannadka soo socda?

U qalmiitaankaada waxaa laga yaaba inuu isbedbedelo sannad ka sannad. Boqoleeyda dib ayaa loo xisaabayaa sannad kasta 60 casho kadib taariikhda sannad guurada qiimeynta la shaaciyey.

Maxaan u isticmaali kara Abaallmarintayda QI?

Abaalmarinta QI waxaa loogu talagalay in loo isticmaalo gaaritaanka goolasha lagu sheegay Qorshaha Hagaajinta Tayada (QIP) iyo waa in la waafajiyaa Qiimeynta Tayada Early Achievers. Abaalmarinta QI ee Heerka 2 ee bixiyeyaasha daryeelka carruurta guriga qoyska waxa loo isticmaali karaa xagga hawlaha taageeraya dib-u-qiimeynta. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalka la oggol ee lacag abaalmarinta ka heli karta Tilmaamaha Howsha Early Achievers.

Macnayaasha

Early Achievers - Early Achievers waa qaab dhismeedka tayada Gobolka Washington. Nidaamkaan heerarka iyo taageerooyinkani waxay ka caawinayaan bixiyeyaasha waxbarashada hore inay sameeyaan hagaajinta tayada joogtada ah ee goobaha waxbarashada hore.

Waaxda Waxbarashada Hore (DEL) - DEL waa hayada hogaanka Early Achievers iyo waxay mas'uul ka tahay horumarinta nidaamka iyo fulinta.

Early Start Act (ESA) Xeerka Bilaabada Hore waa sharciga waxbarashada hore oo dhammaystiran oo ay soo saareen sharci dejiyayaashu Julaay 2015.

Abaalmarinta Hagaajinta Tayada (Abaalmarinta QI) - Abaalmarinta QI waa abaalmarinta lacageed oo la siiyo sannad walba ka qaybgalayaasha Early Achievers si ay u soo buuxiyaan shuruudaha xaq u yeelashada Abaalmarinta lagu xusay Tilmaamaha Howsha Early Achievers.

Taariikhda Shaacinta Qiimeynta- Waa taariikhda ay DEL soo dirayso email ku sheegaysa in qiimayntaada la dhamaystiray oo waxaa ka daawan karaa iyada oo loo marayo Bixiyaha Guura ee WELS.

Kabitaanka Daryeelka Carruurta ee Gobolka Washington - barnaamijyada kaalmada daryeelka carruurta gobolku waxa uu caawiya qoysaska u qalma isagoo carruurta ka bixiya kharashka daryeelka carruurta. Barnaamijyadaas waxaa ka mid ah:

- Daryeelka Carruurta ee Xiriirinta Shaqada (WCCC)
- Daryeelka Carruurta ee Xilliyeedka (SCC)



- Barnaamijka Daryeelka Carruurta Hoy La'aanta (HCCP)
- Maamulka Carruurta (CA)